

# Dugsiyada Dadweynaha Buffalo

## QEYBTA ADEEGYADA TAAKULAYNTA ARDAYDA

### Badbaadada internetka ee Caruurta iyo Dhalinyarada

**Warbixin shaqsiyeed.** Ha bixinin macluumaad shaqsiyeed adiga oo aan waalidkaa oggolaansho ka haysan. Ha la wadaagin magacaaga dambe, cinwaanka gurigaaga, magaca dugsiya, ama lambarka taleefoonka cid kale. Xusuusnow, sababta oo ah qof ayaa ku weydiistay macluumaad adiga kugu saabsan, taas macnaheedu maahan inaad u sheegto wax adiga kugu saabsan!

**Magaca loo isticmaalo onlayinka** Markii aad sameysaneysid magacaaga onlayinka, ha ku darin macluumaadka shakhsiga ah, sida magacaaga dambe ama taariikhda dhalashadaada.



**Ereyada sirta ah.** Ha la wadaagin lambarkaaga sirta ah qof kale oo aan ka ahayn waalidkaaga. Markaad isticmaaleyso kumbuyuutar dadweyne hubi inaad ka baxdo koontooyinka aad gashay ka hor intaadan ka bixin booskaaga

**Sawiro.** Ha soo dhigin sawirro ama fiidiyowyo khadka tooska ah ee onlayinka adiga oo aan ka helin oggolaansho waalidka.

**Saaxiibada internetka.** Ha oggolaan inaad la kulanto saaxiib khadka onlayinka ah isku barateen illaa aad ka hesho oggolaansho waalidkaa mooyee. Nasiib daro, mararka qaar dadku waxay iska dhigaan dad aysan iyagu ahayn.

**Xayeysiiska internetka.** Ha ku iibsana wax qadka onlayinka adigoon waalidkaa la hadlin marka hore. Xayeysiisyada qaar ayaa laga yaabaa inay isku dayaan in adiga kugu khiyaaneeyaan iyagoo ku siinaya waxyaabo bilaash ah ama kuu sheegaya inaad ku guuleysatay wax sidii qaab ay ku ururinaayaan macluumaadkaaga shakhsiyeed.

**Soo dejinaya (downloading).** La hadal waalidkaa ka hor intaadan furin lifaaqa emaylka ama soo dejisan softiweer. Lifaaqyada mararka qaarkood waxaa kujira fayras. Weligaa ha ka furin lifaaq qof aadan aqoon.

**Xoog Sheegasho.** Ha u dirin ama ha ka jawaabin fariimaha xaasidnimada ama cayda ah. U sheeg waalidkaa haddii aad fariin noocaas ah hesho. Haddii wax onlayinka ku dhaca ee aad dhibsatay, la hadal waalidiintaada ama daryeelahaaga.

**Su'aalaha.** Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto wax aad akhrido, weydii waalidkaa ama xannaaneeyahaaga.